## Xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadka ku saaran

### Waxaad xaq u leedahay:

- Daryeel xushmad leh, badbaado iyo tayo leh oo aad ka helayso adeegayaga kaas oo ah mid ku aqbalsan iyada oo aan loo eegayn heerka aad bulshada ka joogto, aqoonsigaaga lab iyo dhedig, jinsiyadaada, nooca galmo, diinta, caqiidada siyaasadeed, jirro maskaxeed ama baahi kasta oo la heli karo
- In lagula wadaago macluumaad fiican aadna go'aan uga gaarto daryeelkaaga
- Inaad nala wadaagto fikirkaaga ama aad cabasho soo gudbiso taas oo aanana wax saameyn xun ah ku yeelan doonin daryeelka aad hesho
- In baraayfasiga macluumaadkaaga la xqdhowro
- Inaad keensato qof ku taageera (kuu dooda) si ay kuu caawiyaan, sida saaxiib, xubin qoyska ka tirsan ama qof madaxbannaan
- Inaad isticmaasho turjumaan haddii aad ku hadasho luuqad kale
- Noo sheeg haddii aad qowmiyad ahaan kasoo jeedo Aboriginal ama Torres Strait Islander

### Waxay masuuliyad kaa saran tahay:

- In aad dhammaan dadka kale iyo hantida adeeggayaga u muujiso xushmad iyadoon loo eegin heerka ay bulshada ka taagan yihiin, aqoonsiga jinsiga, jinsiga, nooca galmoodka, diinta, aaminsanaanta siyaasadeed, jirro maskaxeed ama baahi kasta oo la heli karo
- Inaad na siiso macluumaad sax ah si aan kuu caawino
- Inaad ixtiraamto sirta dadka kale oo ay ku jirto macluumaadka looga hadlay barnaamijyada kooxaha ah
- Inaad u dhaqanto qaab micneheedu yahay in adiga iyo dadka kale aad amni dareemaysaan markaad na soo booqanayso ama marka aad la joogto shaqaalahayaga
- Inaad nala soo socodso haddii aadan ballanta imaan karin (ugu yaraan 24 saacadood oo ogeysiis ah)

## Xiriirada Holstep Health:

**(03) 9450 2000**
**Wixii suaalo iyo ra'yi wadaagis ah**

Greensborough
West Heidelberg

**1300 637 744 Enquiries**
**(03) 9389 2234 Feedback**

Brunswick
Brunswick West
Coburg
Fawkner
Glenroy
Pentridge
Preston
Vic Place
Wangaratta

**Booqo holstephealth.org.au**

## Xiriirada kale:

**My Aged Care**
(Goobta kowaad ee lagala xidhiidho adeegyada daryeelka waayeelka)1800 200 422

**Carer Gateway**
1800 422 737

**Brunswick Community Medical Centre (Xarunta Caafimaadka Bulshada ee Brunswick)**
1300 056 300

**West Heidelberg Community Legal**
(03) 9450 2002

Banyule Community Health iyo Merri Health hadda

**Holstep Health**
Daryeel bulsho. Oo nolosha oo dhan ah.

Waxaa la daabacay Maarso 2025.
Waxaa taageertay Waaxda Adeegyada Bulshada ee Dowladda Australia. Waxaa taageertay Dowladda Gobolka.

Somali

Holstep Health

Baraayfasiga iyo ra'yi wadaagista

# Xuquuqdaada, baraayfasigaaga iyo ra'yi celinta





Holstep Health waa magaca cusub ee Banyule Community Health iyo Merri Health iyadoona bixin doonta daryeel khibrad ku dhisan oo saaxiibtinimo leh isla sidiisiina ah, aadna ka heli doonto isla goobaha aad hadda ka hesho.

## Fikirkaaga iyo cabashooyinkaaga

Waanu soo dhawaynaynaa oo qiimaynaa dhammaan wixii ra'yi iyo cabashooyin ah sababtoo ah waxay naga caawinaysaa inaan fahanno sida aan u horumarin karno adeegeena. Waxaan uga soo jawaabi doonaa dhammaan wixii ra'yi iyo cabashooyin ah sida ugu dhakhsaha badan waxaanan ixtiraami doonaa sirtaada.

**Waxaad awoodaa:**

- Inaad la hadasho xubin ka mid ah shaqaalaha
- Inaad buuxiso foom markaad booqato
- Inaad kasoo wacdo masuulka u qaabilsan cabashooyinka 03 9389 2234
- Inaad ra'yigaaga noogu soo dirto mareegahayaga

**Haddii aanad ku faraxsanayn natiijada waxaad la xidhiidhi kartaa wakiilka ay khusayso:**

- Guddoomiyaha Cabashooyinka Caafimaadka 1300 582 113
- Guddiga Caafimaadka Maskaxda1800 246 054
- Guddoomiyaha cabashooyinka daryeelka da'da 1800 951 822
- Guddiga Tayada iyo Ilaalinta ee NDIS 1800 035 544

## Badbaadada carruurta

Waxaa naga go'an badbaadada carruurta iyadoo aan habayaraatee loo dulqaadan doonin xadgudubka. Dhammaan eedeymaha iyo walaacyada si dhab ah ayaa loo qaadan doonaa, mar walbana waxaan gudaneynaa waajibaadkeena sharci iyo damiir si aan u soo sheegno khataraha amniga.

Waxaan ka shaqeynaa inaan ka hortagno xadgudubka anagoo aqoonsanayna isla markaasna yareynayna khataraha goor hore, si loo xaqiijiyo badbaadada dhaqanka iyo daryeelka carruurta oo dhan.

## Baraayfasigaaga

Waxaan keydinaa macluumaadka xiriirkaaga iyo caafimaadkaaga si aan u bixino daryeelka ugu fiican, aana uhormarino adeegyada, isla mar ahaantaasna aan u buuxino shuruudaha sharciga ah. Macluumaadka xasaasiga ah waxaan ururinaa oo keliya marka aan kaa helno ogolaanshahaaga haddii loogu baahdo daryeelkaaga. Waxaad dooran kartaa inaadan nala wadaagin macluumaadka qaar, laakiin taasi waxay saamayn kartaa adeeggayaga.

Macluumaadkaaga waxaa arkaya shaqaalaha kula shaqeeya oo kaliya waxaana lala wadaagi doonaa adeegyada kale haddii aad ogolaato ama haddii sharcigu dhigayo. Waxaan ilaalinaa sirtaada, anagoo u kaydinayna macluumaadka si badbaado leh, badanaana lagu keydin doono faylasha elegtarooniga ah.

Waxaad codsan kartaa inaad hesho ama aad saxdo macluumaadkaaga. Kala xidhiidh Kooxdayada tayada 03 9389 2234.

Booqo **www.holstephealth.org.au** si aad u aragto shuruucdeena baraayfasiga khuseysa

## U qalmida

Waxaa laga yaabaa inaan diidno adeegga haddii aadan u qalmin ama aadan kansalin/baajin xaaladaha qaar, sida inaad dhib u geysato macaamiisha, shaqaalaha, ama tabaruceyaasha. Waxaad joojin kartaa adeegga wakhti kasta iyadoo aysana taas wax saamayn ah ku yeelan doonin taageerada mustaqbalka.

## U doodid

Waxa aad dooran kartaa in aad soo kaxaysato saaxiib ama xubin ka tirsan qoyskaaga ay ku wehliyaan marka aad isticmaalayso adeegayaga. Waxay meesha u joogi karaan inay ku taageeraan, ama haddii aad rabto, waxay ku hadli karaan magacaaga.

**Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa ururada kale si ay kuu caawiyaan:**

- Leadership Plus 03 9489 2999
- ADEC 03 9480 7000
- Spectrum MRC 03 9977 9000
- Elder Rights Advocacy (kuwa u dooda xuquuqda waayeelka) 03 9602 3066

## Xeerka Xuquuqda Daryeelka Dadka Da'da ah

Dhammaan macaamiisha daryeelka da'da ah ama qofka loo idmaday ayaa heli doona koobi waxayna heli doonaan fursad ay ku saxiixaan. Saxiixa wuxuu xaqiijinayaa inaad heshay oo aad fahantay, laakiin daryeelka iyo adeegyada ma saamayn doonto haddii aad doorato inaadan saxiixin.

## Kharashyada

Adeegyada qaar waxaa lagu dalacayaa khidmad. Waxaad heli doontaa faahfaahinta kharashka iyo macluumaadka adeeggaaga. Inta badan adeegyada weli waa la heli karaa haddii aadan awoodin inaad lacag bixiso ama aad wax un ku darto khidmadaha adeegyada.La hadal daryeel bixiyahaaga haddii aad walaac qabto.

